



YOUR LIFE
YOUR CARE
YOUR PEOPLE

BetterOnline™ Barta Shabakadda



Dokumentigani wuxuu qeexayaa sida loo dejiyo Magaca isticmaalahaaga iyo eraygaaga sirta ah si aad u bilowdo isticmaalka Barta Shabakadda BetterOnline™ haddii aad tahay Shaqaale Taageero Shakhsi ahaaneed (PSW).

PSW ahaan, marka aad iska diiwaan geliso inaad isticmaasho BetterOnline™, waxaad awoodaa...

- ◆ Inaad aragto macluumaadkaaga lacag bixinta
- ◆ Inaad eegto oo soo dejisato warqada jeegga mushaharkaaga

Tallaabada 1aad: Is diiwaangeli

- 1 Fur birawsarka shabakadda (tusaale ahaan Chrome, FireFox, Internet Explorer, Microsoft Edge, iwm.)
- 2 Gali URL-ka soo socda birawsarka shabakadda:
<http://fms.publicpartnership.s.com/PPLPortal/login.aspx>

FIIRO GAAR AH: Shabakaddan waxaa lagu dari karaa midka *aad ugu jeceshahay (favorite)* birawsarkaaga si aad dhakhso ugu gasho.

- 3 Dooro guja-raaca **Isdiiwaangelinta** ee ku xiga badhanka galitaanka.
- 4 Ka dooro **Oregon** miinyuuga hoos-u-furma.
- 5 Dooro barnaamijkaaga: **AMA FMAS ODDS**
- 6 Dooro dooraaga: **PSW**

Magaca isticmaalaha
Erayga sirta ah
Ma ilowday magaca isticmaalahaaga eraygaaga sirta ah?
 Xusuus magaca isticmaalaha
GAL Ama Is diiwaangeli

Tallaabada 2aad: Xaqiiji Aqoonsiga

- 1 Buuxi meelaha soo socda:

- ◆ **Aqoonsiga Bixiyaha**

Lambar ku yaal waraaqahaaga diiwaangelinta PPL oo ka bilaabmaya xarfaha 'PORF'

FIIRO GAAR AH: Waxaa laga heli karaa xagga hoose ee bogagga badankood ee bushqadaada diiwaangelinta.

- ◆ **Lambarka Amniga Bulshada**

Geli lambarkaaga amniga bulshada ee 9-ka lambar ah.

- ◆ **Magaca Dambe**

Kani waa **magacaaga** dambe.

Hubi in macluumaadka **saxda ah** la geliyay.

- 2 Haddii nidaamku aanu awoodin inuu xaqiijiyo macluumaadkaaga, dhibaataadu waxay noqon kartaa in macluumaadka si qaldan loo geliyay xilligii diiwaangelinta. *Si aad tan u xalliso, fadlan wac adeegga macaamiisha oo bixi aqoonsigaaga PPL PSW, si aanu u xaqiijin karno macluumaadka ku jira faylka.*



YOUR LIFE
YOUR CARE
YOUR PEOPLE

Barta Shabakadda BetterOnline™



Tallaabada 3aad: Macluumaadka Isticmaalaha

1 Buuxi meelaha soo socda:

◆ Magaca isticmaalaha

PPL waxay soo jeedinaysaa inaad isticmaasho xarafka koowaad ee magacaaga hore iyo kan dambe.
Tusaale: Bixiyaha Tijaabiyaha = BTIJAABIYAHA

◆ Erayga sirta ah

Waa inuu ahaadaa ugu yaraan 6 xaraf, ay ku jiraan ugu yaraan 1 xaraf oo tiro ah, 1 xaraf oo xarfo waaweyn ah, iyo 1 xaraf oo xarfo hoose ah. **FIIRO GAAR AH: Erayga sirta ah waa mid kala duwanaysiinaya xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar.**

◆ Xaqiiji erayga sirta ah

Dib u qor erayga sirta ah ee aad hadda sameysay.

◆ Cinwaanka limeylka

PPL waxay isticmaali doontaa cinwaankan iimeylka si ay kuugu soo dirto macluumaadka hadba sida loogu baahdo.
FIIRO GAAR AH: Waxaad heli doontaa xaqiijin iimeyl ah oo ku saabsan magacaaga isticmaalaha iyo eraygaaga sirta ah.

◆ Su'aalaha Amniga

Ka dooro 3 su'aalood miinyuuga hoos-u-furma oo jawaabaha geli meelaha xogta (ku xiga su'aalaha la xiriira).
Haddii aad waligaa u baahato inaad beddesho magacaaga isticmaalaha ama eraygaaga sirta ah, su'aalahani waxay bixiyaan lakab amni si loo ilaaliyo asturnaanta xogtaada.

2 Guji badhanka Gudbi.

Hambalyo!

Hadda waad iska diiwaan gelisay oo diyaar ayaad u tahay inaad gasho barnaamijka Barta Shabakadda PPL BetterOnline!

Maanta nala soo xiriir!

☎ 1-888-419-7705

🌐 pplfirst.com



Barta Shabakadda BetterOnline™



yadoo PPL ay u guurayso dhaqanka ah inaysan boostada ku soo dirin warqadaha mushaharka/ogeysiiska xawilaadda, waxaad u baahan doontaa inaad qaaddo tallaabooyinkan KALIYA haddii aad rabto in warqad ogeysiis xawilaada laguugu soo diro USPS. Uma baahnid inaad wax tallaabo ah qaaddo haddii aanad rabin warqad ogeysiis xawilaada.

Hagahan wuxuu ku siin doonaa tilmaamo ku saabsan sida loo isticmaalo Sifada Soo-gelinta BPM ee BetterOnline®. Waxaad isticmaali doontaa sifadan si aad PPL ugu sheegto inaad isbeddel ku samaysay tilmaamaha lacag bixintaada iyo inaad rabto inaad bilowdo inaad warqad ogeysiis xawilaada ku hesho boostada.

Buuxi foomka lacag dhigaalka tooska ah ee cusub ee loogu talagalay ka qaybgale kasta oo aad u shaqeyso.

- 1 Buuxi dhammaan qaybaha foomka dhigaalka tooska ah oo calaamadee sanduuqa haddii aad rabto nuqul warqadeedka jeegaaga mushaharka.

Jeega Mushaharka

Jeegaaga mushaharka waxaa laga heli karaa barta shabakadda. Haddii aanad haysan isticmaalka internet ee loo maro kombiyuutar, tablet, ama taleefan casri ah, markaas dooro sanduuqa sixista. Fadlan boostada ku soo dir jeega mushaharkayga.

- 2 Marka aad gasho barta adigoo isticmaalaya aqoonsiga aad sameysay, waxaad arki doontaa shaashaddan. Dooro **Soo Gelinta Faylka BPM** ee geeska bidix ee sare.

- 3 Guji badhanka **Browse**, kaas oo ku geyn doona faylasha kombiyuutarkaaga.

Soo Gelinta
Faylka BPM

Foomamka W2

FIIRO GAAR AH: Noocyada faylasha kaliya ee aad soo gelin karto waa PDF iyo JPG

- 4 Soo hel oo dooro faylka(faylasha) oo wata foomka(foomamka) dhigaalka tooska ah ee la cusbooneysiisay, ka dibna guji **Soo Geli Faylka**.

- 5 Marka aad aragto shaashadda hoose, waad dhammeystirtay.

fms.pplfirst.com ayaa leh
Faylka Si Guul Leh Ayaa Loo Soo Geliyay.



- 6 Waxaad dib u eegi kartaa waxyaabaha kale ee ku jira boggaaga ama waxaad ka bixi kartaa kalfadhiga barta adigoo gujinaya badhanka **Logout (Ka bax)** ee geeska midig ee sare.

KA BAX
SIRTA AH

BEDDEL ERAYGA